Washington State Health Care Authority

# Xogta Sirta Apple Health
# Su'aalaha badanaa la is waydiiyo

**Macaamiisha Apple Health (Medicaid):** Waxay isticmaalaan frequently asked questions (su'aalahan badanaa la is waydiiyo, FAQ) si ay wax badan uga ogaadaan sirtaada iyo sida macluumaadkaaga loo bixiyo.

Wixii macluumaad dheeraad ah, ka akhri **bayaanka** ama guudmarka **cida iskaashiga la leeyahay iyo bulshada FAQ**.

## Maxaa dhacay?

The Health Care Authority (Maamulka Daryeelka Caafimaadka, HCA) waxa uu macluumaadka shakhsi ahaaneed sida magacaaga, cinwaankaaga, lambarkaaga taleefanka, iyo adeegyadaada daryeelka caafimaadka u diray Centers for Medicare and Medicaid Services (Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid, CMS). CMS waxaa weeye hay'ad federal oo maamula Medicaid.

HCA way aaminsan tahay laakiin may xaqiijin in macluumaadkan lala wadaagay Department of Homeland Security (Waaxda Amniga Arrimaha Gudaha, DHS). HCA waxay ogaatay foomkan **sheego warar ah oo lagu baahiyay Juun 13, 2025**.

## Sababmay u dhacday tani?

Sheekada warku waxay sheegeysaa in CMS ay ku amreen inay u sheegeey macluumaadkan DHS hogaamiyayaasha U.S. Department of Health and Human Services (Waaxda Maraykanka ee Adeegyada Caafimaadka iyo Bilaa Aadanka, HHS). HHS waxay kormeertaa barnaamijyo daryeel caafimaadka oo badan oo dalka oo dhan ah, iyo CMS waxay ka qayb ka tahay HHS.

## Yaa lala wadaagay macluumaadka shakshi ahaaneed?

HCA waxay u dirtaa macluumaadka CMS ee dadka ku jira barnaamijyada Apple Health si ay u helaan deeqda federalka. Waxaa kamid ah Banaadhinta Apple Health.

Wakhti xaadirkan, ma garanayno waxa rasiga ah ee CMS ay la wadaagtay DHS. Waxa aan ka shakisanahay in DHS ay hayso macluumaad shakhsi ahaaneed ee dadka isticmaala Apple Health (Medicaid).

## Miyaan ilaalin karaa macluumaadkayga aniga oo joojinaya Apple Health?

Maya, joojinta caymiskaaga Apple Health iminka masoo celinayo macluumaadka aad hore ula wadaagtay CMS.

Dhamaan gobolada waxaa ugu waajib ah inay macluumaadkan la wadaagaan dawlada federalka sanado badan.

## Waa maxay sababta HCA ay ula wadaagto macluumaadkayga CMS?

Dawlada federalku waxay siisaa lacag gobolka si ay gacan uga gaysato bixinta lacagta Apple Health (Medicaid). Si aad u hesho lacagtan, HCA waxa uu sharcigu ku khabsayaa inay la wadaagaan macluumaadka CMS.

## Waxaan leeyahay caymiska la Balaadhiyay ee Apple Health. Miyaa la wadaagay macluumaadkayga?

Haa. Hadii aad ku jirto Apple Health la Balaadhiyay, macluumaadkaaga waxaa lala wadaagay CMS. Inkasta oo badanaa adeegyada Apple Health la Balaadhiyay uu bixiyo kharashkoodu gobolku, dawlada federalka lacagteeda ayaa loo adeegsadaa booqashooyinka daryeelka caafimaadka ee xaalada degdega ah.

### Miyaa xaalada sharciga aan ku joogo dalka lala wadaagay CMS?

HCA ma gaadhsiiso xogta gaar ah, xogta xaalada degnaanta ee shakhsi ga CMS. Dadka ku jira Apple Health Expansion, xaalada deganaanshaha ee ku dhawaad ruux walba waxaa lagu sheegey:

- 'Ruux aan ahayn muwaadin', tan waxaa loola jeeda ruux aan haysan dhalashada, ruux la siiyay xaalad deganaanshe oo gaar ah, ama
- Qaataha adeegyada xaalada degdega ah, waxay ka dhigan tahay waxa aad u qalantaa adeegyada xaalada degdega ah ee hoos yimaada Barnaamijka Caafimaadka Xaalada Degdega ah ee Aliens, ama
- Ku qoran 'waxkale,' waxa uu ka dhigan yahay in ayna jirin qaybo kale oo sharaxa xaaladaada degnaanshuhu.

### Sidee ayaa macluumaadkan ay u isticmaali doontaa DHS?

Ma garanayno sida macluumaadka deganaanshaha ruuxa loo isticmaali doono. Waxa aanu ka shakisanay inay isticmaalaan ciidanka laanta socdaalku.

## Maxay tahay in aan sameeyo hadii DHS ay u isticmaasho macluumaadkayga laanta socdaalka?

Hadii aad ka warwarsan tahay laanta socdaalka, booqo Xafiiska Gobolka Washington ee Xeer Ilaaliyaha Guud **Baro Xuquuqdaada: websaytka Ciidanka Laanta Socdaalka ee Washington** si aad u barato xuquuqdaada.

Websaytkan waxaa ku jira macluumaad kaa caawin kara inaad noqoto diyaar hadii ay kulasoo xidhiidhaan ciidanka laanta socdaalku. Waxa aad u turjubi kartaa websaytka luuqado badan adiga oo isticmaalaya agabka ku yaala dhanka bidix ee shaashada ama si aad u eegto turjubaada xogta Baro Xuquuqdaada ee boga 3.

## Miyaan ka bixi karaa la wadaagista macluumaadkayga fawlada federalka?

Maya. Hadii aad leedahay caymiska Apple Health, HCA waxaa ku waajib ah inay la wadaagto macluumaadkaaga dawlada federalka. Waxaa waajibiyay sharciga federalka. Kama bixi kartid.

Waxa aad iska joojin kartaa wakhti kasta cayiskaaga Apple Health. **Baro sida loo joojiyo caymiskaaga si onleynka ah**. Joojinta caymiskaaga Apple Health iminka masoo celinayo macluumaadka aad hore ula wadaagtay CMS.

## Sidee ayaan u ogaan karaa in macluumaadkayga la bixiyay?

Hadii aad ku jirto Apple Health, ama hadii hore aad ugu jiri jirtay, macluumaadka waxaa lala wadaagay CMS, sida sharcigu dhigayo.

Waxaa kamid ah dadka ku jira ama ku jira liiska sugayaasha Balaadhinta Apple Health ee daryeelka ku hela barnaamijka Apple Health.

Macluumaadkaaga lama wadaagi doono hadii aad dalbatay Apple Health laakiin laguu diiday oo aanad weligaa ku biirin.

## Maxaan haystaa ikhtiyaaro hadii aan joojiyo Apple Health ee caymis caafimaad ee kale?

Hadii aad qabato isbitaal, waxa aad u qalmi kartaa kaalmo in lagaa bixiyo sida uu dhigayo **Sharciga Daryeelka Samogalka ee Washington**. Waxa aad sidoo kale heli kartaa daryeel bilaash ah ama qiimo jaban xarunta caafimaadka ee bilaashka ah ama Xarunta Caafimaadka Bulshada.

## Sidee ayaan u bedeli karaa cinwaankayga ama lambarkayga taleefanka?

Qabo **hca.wa.gov/report-a-change** si aad u ogaato sida loo geleyo macluumaadkaaga xidhiidhka. Tilmaamaha waxaa lagu heli karaa luuqado badan.

HCA waxay bedeshaa cinwaanka hal mar bishii. Maadaama oo uu nagu waajib yahay in aanu gudbino faylashada bil kasta CMS, cinwaanka cusub ayaa marka loo diraa CMS marka la bedelo. CMS waxay haystaa dhamaan macluumaadka. Tani waxay ka dhigan tahay inay helayaan macluumaadka xidhiidhka ee hore iyo ka cusub.

## Sidee ayuu gobolku u ilaaliyaa macluumaadkayga?

HCA waxa uu sharciga gobolka iyo federalku ku waajibiyay inay u isticmaalaan ama u bixiyaan macluumaadkaaga caafimaad sababo qaar kaliya.

HCA waxay qaadaysaa talaabooyin ay ku xadidayso inta uu le'eg yahay macluumaadka la wadaagayo. Tusaale ahaan, ma wadaagno xogta badanaa acaafimaadka caafimaadka (sidoo kale loo yaraano dalabyada) ee dadka ku jira Balaadhinta Apple Health. Waxaa weli nagu waajib ah macluumaadka dadka ku jira Balaadhinta Apple Health, iyo sidoo kale xogta dalabyada ee adeegyada ay ku helaan xaalada degdega ah, kaansarka ama daawaynta kalyaha, ama daryeelka qaliinka bedelka unuga kadib. Adeegyadan waxaa lagu maalgeliyaa lacagta federalka, markaa HCA waa inay weli ka warbixiso.

HCA waxay eegeysaa qaabab dhaama oo dadka loo siido daryeelka ay u baahan yihiin iyada oo xogta la wadaagayo la yaraynayo. Waxa aanu kala shaqaysaa Xafiiska Badhasaabka iyo dadka kale ee aanu iskaashiga leenahay sidii aanu isbedeladan sida ugu shakhsaha badan ugu samayn lahayn.

## Ma in aan weli qabtaa balamahayga caafimaadka ama inaad doonto dawooyinka la ii qoray?

Haa. Waa muhiim in aan la socoto daryeelka aad u baahan tahay. Waxa aan doonaynaa in aan dareento amaan marka aad doonaynayso daryeelka aad u baahan tahay. Waxa aanu kala shaqaynaynaa cida aanu bulshada kala shaqayno si aanu uga dhaadhicino xuquuqdaada iyo sida loosii wadi lahaa amaanka lagu siinayo, helitaanka daryeelka caafimaad ee ruux kasta oo Washington ku sugan.

## Yaan ula xidhiidhi karaa wixii su'aalo iyo tabashooyin ah ee ku saabsan sirtayda?

### Gunooyinka shacabka iyo laanta socdaalka

**Hadii aad ka warwarsan tahay sida isticmaalka gunooyinka caafimaadka shacabka ay kuu samaayn karaan**, kala hadal looyarka laanta socdaalka. Waxa aad ka heli kartaa kaalmo sharci oo bilaash ah ama jaban Washington **immigrationlawhelp.org**. Websaytkan waxa uu ka caawiyaa dadka saboolka ah ee soo geleytiga inay helaan kaalmo sharci oo lagu kalsoon yahay.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida gunooyinka shacabku u saamayn karto xaaladaada laanta socdaalka, booqo **nidaamyada iyo qaabka dulsaarka shacabka ee USCIS**.

### Baro xuquuqdaada

Hadii aad ka warwarsan tahay haynta xogtaada ee DHS, booqo Xafiiska Gobolka Washington ee Xeer Ilaaliyaha Guud **Baro Xuquuqdaada: websaytka Ciidanka Laanta Socdaalka ee Washington**. Guji luuqada hoose si aad u hesho macluumaadka oo turjuban.

**Amharic** | **Arabic** | **Chinese (Simplified)** | **Chinese (traditional)** | **German** | **Hindi** | **Japanese** | **Khmer** | **Korean** | **Marshallese** | **Punjabi** | **Russian** | **Samoan** | **Somali** | **Spanish** | **Tagalog** | **Ukrainian** | **Vietnamese**

## Halkeen ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Si aad u akhrido macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida HCA ay u ilaaliso macluumaadkaaga, booqo **hca.wa.gov/apple-health-privacy**.